

Warqada Xaqiiqaha 3: Ku saabsan codeynta (Doorashada Gobolka)

Galbeedka Australia gudihiisa, waxaa jira laba aqal oo Baarlamaan.

Aqalka hoose waxaa la yiraahdaa Golaha Shacabka ee Sharci dejinta. Wuxuu ka kooban yahay 59 xubnood.

Xubin kasta waxaa loo doortay inay metesho mid ka mid ah 59 degmo doorasho.

Aqalka sare waxaa loogu yeeraa Golaha Sharcidejinta.

Wuxuu leeyahay 36 xubnood, oo ka kooban lix xubnood oo ay soo doorteen midkasta oo ka mid ah lixda qaybood ee doorashada.

Waxaad u coddeysaa musharixiinta doonaya inay metelaan degmada ama qaybta aad degan tahay. Kuwa ku guuleysta ayaa noqonaya xubnahaaga la doortay.

Inta lagu jiro doorashooyinka guud, waxaa lagu weydiinayaa inaad u coddeyso qofkaad dooneysid inuu ku metelo:

- degmada Golaha shacabka ee Sharcidejinta
- qaybta Golaha Sharcidejinta.

Si aad u coddeyso, waxaa lagu siin doona laba warqadood oo coddeyneed.

Ta yar, warqada codbixinta ee cad waa Golaha Shacabka ee Sharcidejinta (degmadaada).

U akhri tilmaamaha si taxadar leh.

Isticmaal lambaro keliya.

Adoo ka bilaabaya lambarka '1', lambari dhammaan sanduuqyada sidii aad adigu doorato.

Warqada balaaran ee codbixinta midabka leh waxaa loogu talagalay Golaha Sharcidejinta (qaybtaada).

U akhri tilmaamaha si taxadar leh.

Isticmaal lambaro kaliya.

Waxaad leedahay laba doorashooyin oo u calaamadeyn kartid warqada codbixinta.

Waxaad ku qori kartaa lambar '1' sanduuqa ku xigga xisbiga ama kooxda aad ka doorato laynka korkiisa.

ama

waad u lambarin kartaa dhammaan sanduuqda laynka ka hooseysa sidii aad doorato.

Waxaad weydiisan kartaa sarkaalka codbixinta inuu ku caawiyo wakhti kasta.

Noqo musharax

Si aad u noqotid musharax, waa inaad diiwaangashan tahay si aad u coddeyso.

eeg 'Waxa ku saabsan diiwaangelinta' wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sidii aad isu diiwaangelin lahayd.

Si aad u magacowdo, waxaad u baahan doontaa inaad:

- buuxiso foomka magacaabista
- bixi dhammaan macluumaadka la codsaday
- bixi debaaji.

Caddadka debaajiga ah wuu kala duwan yahay iyadoo ku xiran inaad isu magacaabaysid doorashada Gobolka, Dawlada dhexe ama dawlada hoose.

Adigaa ismagacaabi kara ama xubin ka mid ah koox ama xisbi siyaasadeed.

Wixii macluumaad dheeraad ah, gal www.elections.wa.gov.au ama wac 13 63 06 ama (08) 9214 0400 ka soo wacayaasha gobolada.